

Cudurka asaasaqa ee nooca Frontotemporal

XAASHIDA XAQIIQDA EE KA SOO BAXDA XARUNTA ISWIDHISHKA EE CUDURKA ASAASAQA

Frontotemporal demens • faktablad på somaliska

Waxay saamaysaa qaybaha hore ee maskaxda

Cudurka Asaasaqa ee nooca Frontotemporal (FTD) waxaa sidoo kale loo yaqaanaa sii-xumaanshaha qaybta frontotemporal ama dementia-da qaybta hore ee maskaxda. Cudurku waa mid aan badneyn. Waxay keentaa in unugyada dareemayaasha ay ka lumaan qaybaha hore ee maskaxda, qaybta lo yaqaano frontal lobe ama qaybta kale lo yaqaano temporal lobe dhinaceeda hore. Calaamaduhu si tartiib-tartiib ah ayey u kordhaan, si la mid ah cudurka Alzheimerska, laakiin waxaa sidoo kale jira kala duwanaansho cad oo u dhexeeya cudurrada.

Calaamadaha cudurka Asaasaqa ee aan caadiga ahayn

Illowga iyo dhibka barashada waxyaabaha cusub waa calaamadaha hore ee cudurka Alzheimerska, balse waxay soo baxaan keliya marxaladaha dambe ee Cudurka Asaasaqa ee nooca Frontotemporal. Calaamadaha ugu horreeya waa beddelka dabecadda ama luqadda oo adkaata, taas oo ku xidhan qaybta maskaxda ee habka cudurku ka bilowdo.

Isbeddelka shakhsi ahaaneed

Qaybta hore ee maskaxda ayaa inta badan dhaawac noqota marka hore. Halkaan ayaa lagu xakameeyaa feejignaanta, go'aan qaadashada iyo xakamaynta dareenka degdega ah. Shakhsiyadda qofka cudurka Asaasaqa qaba ayaa si tartiib-tartiib ah isu beddesha waxaana laga yaabaa inay bilaabaan inay muujiyaan xukun xumo.

Dhibaato sii kordheysa oo ku timaadda qaadashada hindisaha, iyo xanaaq aan la sharraxin, waa calaamado hore oo kale. Waa wax iska caadi ah in qofku uu nasasho la'aan yahay, dareen ahaan kabuubyo, mararka qaarkoodna aan danayn. Awoodda lagu dareemo naxariista ayaa si tartiib-tartiib ah u sii xumaanaysa. Cunista xad-dhaafka ah, cabintaanka sigaarka ama khamriga ayaa sidoo kale lagu arki karaa.

Dhibaatooyinka luqadda mararka qaarkood

Cudurka Asaasaqa ee nooca Frontotemporal waxay sidoo kale ka bilaaban kartaa qaybta lo yaqaano temporal lobe dhinaceeda hore, taas oo muhiim u ah luqadda. Kiisaska noocan ah waxaa lagu arkaa *aphasia horumarsan*, taas oo keenta in fahamka erayada uu daciifo iyo dhibaatooyin lagu magacaabo waxyaabo kala duwan si sax ah. Waxa kale oo lagu garan karaa hadal gaabis ah oo googo'an oo leh khaladaad naxwe ahaaneed oo badan.

Caawimo badan iyo in ka badan ayaa loo baahan yahay

Ma aha wax aan caadi ahayn in cudurka Asaasaqa ee nooca Frontotemporal uu bilaabo inuu kobco horraantii da'da dhexe. Cudurku wuxuu markaa sii socon karaa sannado badan. Calaamaduhu waxay si tartiib-tartiib ah u sii xoogaystaan oo ay u bataan marka dhaawaca maskaxdu uu faafo. Way sii adkaanaysaa in lala qabsado nolol maalmeedka, ugu dambayntiina waxa loo baahan yahay in laga caawiyo lebbiska, nadaafadda iyo daryeelka shakhsi ahaaneed ee kale.



Ogaanshaha hore waa mid aad muhiim u ah

Cudurka Asaasaqa ee nooca Frontotemporal waxaa lagu khaldi karaa niyad-jab, daal ama dhibaatooyin kale oo dhimirka ah. Cudurku waa adag yahay in la ogaado sababtoo ah calaamadaha caadiga ah ee Asaasaqa ma muuqdaan bilowga cudurka.

La xiriir dhakhtar haddii aad u malaynayso in adiga ama qof aad jeceshahay uu saameeyay cudurka Asaasaqa ee nooca Frontotemporal. Qiimaynta waa in la bilaabo sida ugu dhakhsaha badan. Tan waxaa badanaa lagu sameeyaa rugta caafimaadka takhasuska leh (minnesmottagning), waxaana ku jira tiro tijaabooyin iyo baaritaanno kala duwan iyo sidoo kale wareysiyo lala yeesho qaraabada.

Daawaynta iyo maaraynta

Cilmi-baaristu waxay samaysay horumar, laakiin hadda ma jirto dawo loogu talagalay cudurka Asaasaqa ee nooca Frontotemporal. Wali waa muhiim in la helo sharaxaad calaamadaha si loo awoodo in loo qorsheeyo nolol ugu fiican uguna macquulsan.

Aalaadaha guriga iyo daryeelka caafimaad ee wanaagsan waxay noloshu ka dhigi karaan mid fudud siyaabo kala duwan. Waxa kale oo muhiim ah in la isku dayo in la abuurro nabad iyo xasillooni agagaarka qofka, sababtoo ah walbahaarku inta badan calaamadaha ayuu xoojiyaa.

Wax badan ka akhriso online:

www.frontallobsdemens.se (Swedish FTD Initiative)

© Svenskt Demenscentrum

Warbixin dheeraad ah iyo waraaqaha xaqiiqada oo soomali ah ayaa laga heli karaa website-ka Svenskt Demenscentrum: www.demenscentrum.se/so



Svenskt Demenscentrum

Svenskt Demenscentrum, Sveavägen 155, 113 46 Stockholm, (08) 690 58 00, info@demenscentrum.se

www.demenscentrum.se

Frontotemporal demens

FAKTABLAD FRÅN SVENSKT DEMENSCENTRUM

Drabbar hjärnans främre delar

Frontotemporal demens kallas även för pannlobs- eller frontallobsdemens. Sjukdomen, som är relativt ovanlig, gör att nervceller förtvinar i hjärnans främre delar; i pannloben eller i främre delen av tinningloberna. Symtomen kommer smygande, på samma sätt som vid Alzheimers sjukdom, men det finns även tydliga skillnader mellan sjukdomarna.

Inga vanliga demenssymtom

Glömska och inlärningssvårigheter som är tidiga tecken vid alzheimer kommer först senare i sjukdomsförloppet vid frontotemporal demens. Tidiga symtom är istället antingen beteendeförändringar eller språksvårigheter, beroende på var i hjärnan sjukdomsprocessen startar.

Personligheten förändras

Oftast skadas pannloben först. Härifrån styrs koncentration, omdöme och impulskontroll. Personligheten hos den som insjuknar börjar långsamt förändras och personen kan börja bete sig omdömeslöst.

Ökade svårigheter att ta initiativ och oförklarliga vredesutbrott är andra tidiga tecken. Det är vanligt att personen kan vara rastlös, känslomässigt avtrubbad och ibland apatisk. Förmågan att känna empati försämras gradvis. Även överkonsumtion av mat, rökning eller alkohol kan förekomma.

Språksvårigheter i vissa fall

Frontotemporal demens kan också starta i främre delen av tinningloberna som är av betydelse för språket. I dessa fall talar man om *progressiv afasi* som kan yttra sig som försämrad ordförståelse och problem med att rätt benämna olika saker. Det kan också ta sig uttryck i ett trögt och upphackat tal med många grammatiska fel.

Behöver allt mer hjälp

Det är inte ovanligt att frontotemporal demens debuterar redan i övre medelåldern. Sjukdomen kan sedan pågå under många år. Symtomen blir fler och gradvis allt starkare i takt med att hjärnskadan sprider sig. Det blir allt svårare att klara sin vardag och så småningom behöver personen hjälp med påklädning, hygien och annan personlig omvårdnad.



Tidig diagnos viktig

Frontotemporal demens kan förväxlas med depression, utmattningssyndrom eller annan psykisk ohälsa. Eftersom typiska demenssymtom är ovanliga i början är sjukdomen svår att upptäcka.

Kontakta en läkare om du misstänker att du eller en närstående kan vara drabbad av frontotemporal demens. En utredning bör snarast påbörjas. Den brukar i regel göras på en specialistklinik (minnesmottagning) och innehåller en rad olika tester och undersökningar samt intervjuer med anhöriga.

Behandling och bemötande

Forskningen har gjort framsteg men ännu så länge finns inget sätt att bota frontotemporal demens. Det är ändå viktigt att få en förklaring till symtomen för att kunna planera för ett så bra och meningsfullt liv som möjligt.

Hjälpmiddel och god omsorg kan på olika sätt underlätta tillvaron. Det är också viktigt att försöka skapa lugn och ro runt den sjuke eftersom stress ofta förstärker symtomen.

Läs mer på webben: www.frontallobsdemens.se (Swedish FTD Initiative)

2025 • Svenskt Demenscentrum ©

Fler faktablad på olika språk kan skrivas ut från Svenskt Demenscentrums webbplats: www.demenscentrum.se/Faktablad



Svenskt Demenscentrum

Svenskt Demenscentrum, Sveavägen 155, 113 46 Stockholm, 08 - 690 58 00, info@demenscentrum.se

www.demenscentrum.se